

# WAA MAXAY GUUSHA DHABTA ?

“ Guushu waa ay micno badantahay balse ciskasta si uun bay ,  
u aragtaa waa inaad xaqiijisaa adiga waxa aad guusha u aragtid  
Adigon kabaxeynin moraalka guud ee gusha “

orahdii : zeyd said suleiman "garaad"

what is real

SUCCESS



**“Dadaalaa Xaaji Caabaas wuu gaadhaa Dhaafaana”**

<b>WAA MAXAY GUUSHA.....</b>	<b>3</b>
<b>SIDA LOO NOQDO QOF GUULAYSTA NOLOSHA.....</b>	<b>5</b>
<b>HANASHADA FURAHA GUUSHA.....</b>	<b>9</b>
<b>10-KA FURE EE GUUSHA (10 KEYS OF SUCCESS) .....</b>	<b>14</b>
<b>HANASHADA GUUSHA NOLOSHA.....</b>	<b>17</b>
<b>TALOOYINKA GUUSHA EE WAXBARASHADA.....</b>	<b>20</b>
<b>KA ADKAAN-SHIYAHA NAFTU WAA FURAHA GUUSHA.....</b>	<b>24</b>
<b>MAXAAD NAFTAADA KU HORUMARIN KARTA.....</b>	<b>28</b>
<b>SIFOOYINKA DADKA GUULEYSTA.....</b>	<b>33</b>
<b>DABEECADAHA GUUSHA.....</b>	<b>35</b>
<b>WADOOYINKA GUUSHA.....</b>	<b>38</b>
<b>GUULEYSTAYAASHA CAQLIGA BADAN.....</b>	<b>44</b>
<b>RAMADANTA IYO TARBIYAYNTA GUUSHA.....</b>	<b>46</b>
<b>TIXRAAC.....</b>	<b>47</b>
<b><u>Waa maxay Guusha?</u></b>	

Guushu Waa Helida dhamaan Waxaad Ka Doonayso Nolosha Amase Fulinta Qorshihii Aad Hore U Dajisatay, Islamar Ahaantaana Guushu Waa Adoo Kaca Aroortii Adoo Dareemaya Farxad Oon Aan Dareemayn Cidhiidhi Iyo Diiqad.

Guusha Waa Wax La Is Barbar Dhigi Karo (Relative) Qof Walba Siduu U Dareemo Ayuu U Arkaa Macnaha Guusha Amase Haddaan Sikale Kuugu Dhigo Guusha Way Macno Badantahay Mana Lahan Qeexitaan U Gooni Ah Oo La Isku Raacay. Waxaan Shaki Kujirin Inaan La Isku Raacsaneen Waxa Guul Loo Yaqaano Balse Adiga Iskuday Inaad Ka Jawaabto Su'aashaan: Maxaad Guul U Taqaanaa Maxaase Ku Cabirtaa Guusha? Waxaa Jirta Su'aal Aheed Waa Maxay Guusha? Oo La Weydiiyey Aqristayaasha Wargeyska "The Dreamer's Guide Motivation Newsletter" Bal Aan Kusoo Gudbiyo Jawaabaha Ay Kasoo Kala Bixiyeen:

**Isaac Alex Phiri:**

"Aniga ma sheegi karo macnaha dhabta ah ee guusha lakiin waxaan kusoo koobi lahaa hab fudud oo ah:

1. Inaad gaarto barta riyadaada kuu tilmaamayso
2. Markaad hesho waxa aad u baahantahay
3. Markaad ka talaabsato daruufaha iyo caqabadaha nolosha

**Geoffrey Nkhoma:**

"Aniga guusha waxaan ku cabiri lahaa farxada; farxadaas oo ka imaanaysa markii aan aragno dadka aan jecelnahay oo faraxsan masii jirayso farxada haddii anaga oo kalliya aan faraxsanahay."

**Janett Kalale:**

"...Guusha macnaheedu waa inaad gaarto natiijada ugu sareyso ugunna macquulsan."

**Mary Masum buko:**

Guusha

“Guusha waa inaad isku dhiibto Allah: Waa bixiyaha nabadda dhabta ah ee addanuhu raadiyo. Guusha waa xakameenta noloshaada, Inaad qaabbayso qorshaha noloshaada oo aad xaqiijiso [Sidii aad ku gaari laheed]...Taas ayaan guul u arkaa.”

Suurta gal waaye inaad nolosha ku guulaysato adigoo aadan hanti badan tacbanin.

Sikastaba, Waxaan layaabbay waxa adiga guul kuu ah dadka kale guul umma ahan!

Haddaba, Bal aan isla eegno waxa ay ka yiraahdeen iyo qeexitaanada ay ka kala bixiyeen aqoonyahanada guusha odorosta iyo Qaamusyada kala duwan.

### **1. *Jim Rohn:***

“Guusha waa inaad samayso shey iska caadi ah adigoo u samaynaayo hab aan caadi aheen.”

#### **1. Humphrey:**

“Waxaan guul u garannayaa sida soo socota:

2. Farxadda qoyska
3. Xiriirka aad la leedahay Allah
4. ku kalsoonaanta nolosha

#### **• Qaamuuska Af-Soomaaliga:**

1. Dagaalka ama tartanka oo lagu adkaado; lib; libin; liibaan.
2. Cid haddadid ama Xoolo aroor oo wabax ah meel ceelka u dhow habeen u hoyasho.

- **Qaamuuska Webster's:**

1. Inaad hesho ama aad gaarto Hoddantinimo, Caannimo.
2. Inaad saxdo ama aad gaarto iskuday aad jamatay.

- **Qaamuuska Oxford:**

1. Inaad gaarto himilo ama ujeedo.
2. Inaad hesho Caannimo, Hodan tinimo ama aqoonsi bulsho.

### **Sida loo noqdo qof guulaysta nolosh**

Si Kasoo Horjeeda Sida Dad Badani Aaminsanyihiin Ma Jiraan Dad Aan Guulaysan Amase Guuldaraystaa, Hase Ahaatee Waxa Jira Dad Haysta Fursadaha Lagu Guulaysto Kuwaasi Yaqaana Sida Looga Faa'idaysto. Waxa Kaloo Jira Dad Haysta Fursadahaas Balse Aan Garanayn Sida Looga Faa'iidaysto.

Waxa Kaliya Eed Ubaahan tahay Inaad Qabato Si Aad Guul Ugaadho Waa Inaad Si Sax Ah U Qabato Waxa Dadka Guulaystay Sameeyeen.

Markaad Akhridid Warbixintan Hoose Waxaad Si Buuxda U Heli Doontaa Dhamaan Fikradihii Ay Xambaarsanaayeen Dadka Guusha Gaadhay Taasi Oo Kaa Caawinaysa Inaad Guul Gaadho.

### ***Maxaan u guulay-san waayay?***

Hadaad dhab u doonayso inaad guulaysto waa inaad si qotodheer u fahantaa fikradaha guud ee cayimaya fursadahaaga kaana dhigaya qof aan guulaysan.

Dadka guulaystaa waxay ka fogaadaan fikradahaan curyaamiyay dad badan sidoo kale waa inaad adna ka fogaataa:

- **Fikradaha khiyaaliga ah:** Fikradaha khiyaaliga ahi waa fikradaha aan saxda ahay eed naftaada ama wax ka aaminsantahay.  
Fikradaha khiyaaliga ah waxaa ka mida "waligay shaqo ka heli maayo wadanka" ama

## Guusha

“tan waxba ma dhexyaalaan”.Fikradaha khiyaaliga ahi waxay si toos ah uxadidaan fursadahaaga dhabta ah iyo guushaadaba.Ka takhalusida fikradahaas iyo inaad waxbadan ka ogaataa waa hawsha ugu muhiimsan ee ay tahay inaad qabato haddii aad u jeelantahay guul. Fikradaha khiyaaliga ahi ma xadidayaano oo kaliya fursadahaaga balse waxay burburin karaan nolohaada.

- **Adkaysi la'aan:** Kawaran adigoo leh waxbarasho tayo sare leh iyo xirfado aad u sareeya hadii aad ka rajo dhigto guusha kadib markaad guul daraysato hal ama laba jeer? dadka kaliya ee noloha ku guulaystaa waa dadka adkaysiga leh kuwa aan ka hadhin haddafkooda iyo hiigsigooda illaa inta ay ka helayaan waxay doonayaan xataa haday waxkastaa lidi ku noqdaan iyo xataa haday guul daraystaan waxbadan.
- **Isbadal la'aan:** Isbadalku waa awooda lagula qabsado xaaladaha guud. Waa awooda layskugu dayo shay kale ama habkale hadii uu hab kuu shaqayn waayo.Isbadalkaaga oo bata waxaa badanaya laqabsashada aad la qabsanayso xaaladaha kala duwan taasi oo badinaysa fursadahaaga guusha.
- **Qorshe la'aan:** hadii aanad hadaf iyo qorshe lahayn ogow inaad noqonayso qayb ka mid ah dadka kale qorshahooda. Hadii aanay kuu qorshaysnayn inaad noqoto hogaamiyaha tiimka ama kooxda aad wada shaqaysaan qof kale oo kamida kooxda ayaa qorshaysan doona sidoo kale hadii aanay kuu qorshaysnayn inaad ku dadaasho shaqada mushaharka sare leh ogow in qof qorshaystay uu kaa buuxin doono. Wuxuu kaa buuxin doonaa booskaa mushaharka sare leh, lacagta badana isagaa qaadan doona, isaga ayaana caan noqon doona halka aad ka noqon doonto daawade. **qorshuhu wuxuu door muhiim ah ka ciyaaraa guusha.**

## HANASHADA FURAHA GUUSHA



Nacaybka jacayl ku badal.  
Dulmiga cadaalad ku badal.  
Carada cafis ku badal.  
Murugta farxad ku badal.

Fudeydka kaadsiinyo ku badal.  
 Bakhaylnimada wax bixin ku badal.  
 Cadowtooyada raxmad ku badal.  
 Tuhmada cudurdaar ku badal.  
 Niyadxumada niyadwanaag ku badal.  
 Aargudashada saamaxaad ku badal.  
 Cayda ammaan ku badal.  
 Islaweynida islayaraan ku badal.  
 Ixtiraam dararada maamuus ku badal.  
 Xanta inaad iska dayso ku badal.  
 Xasadka inaad dadka khayr la jeclato ku badal.  
 Xiqdiga qalbi furnaan ku badal.  
 Afdheerida afgaabni ku badal.  
 Warxumatashiilka habsiino ku badal.  
 Khayaanada amaano ku badal.  
 Xumaanta wanaag ku badal.  
 Dabeecadda xun dabeecad wanaagsan ku badal.

Haddii intaas lagaa helo adna waad ku caafimaadi dunida, oo waxaad kasban tixgalin iyo jacayl, aakhirana waxaad filan ajarka uu mid kasta oo intaan ka mid ahi gaar u leeyahay oo dambi dhaaf iyo darajaba leh.

### **Abu Suleiman (Xijaabtay )**

Abu Solaiman wuxuu ka mid ahaa hoggaamiyeyaashii ugu sarreeyay ee Kooxda Abu Sayyaf, oo ah koox Islaamka xag-jirka ah oo ka hawlgala dalka Philippines. Intii uu ahaa madaxa hawlaha iyo saadka ASG, Solaiman, iyo Khadaffy Janjalani, waxay ka mas'uul ahaayeen afduubyadii iyo dilkii loo geystay laba qof oo ay jinsiyaddoodu ahayd Mareykan iyo Filibiin. Waxaa lagu eedeeyay afduubyadii Martin iyo Gracia Burnham iyo laba qof oo kale oo Mareykan ah. Wuxuu kaloo Suleiman ka qayb qaatay madax gooyadii lagu sameeyay Guillermo Sobero, oo ahaa qof kale oo Mareykan ah. Suleiman mas'uul kama ahayn weerarradaan oo kaliya wuxuu kaloo ka qayb qaatay qorshaha iyo fulinta weerarro badan oo lagu qaaday danaha Mareykanka, waxaana ka mid ahaa weerarradii lagu qaaday Safaaradda Mareykanka ee Manila iyo Superferry 14 iyo qaraxyadii bamka ee Valentines Day, oo ay guud ahaan ku dhinteen ama ku dhaawacmeen dad aysan quseynin.

16-kii Janaayo, 2007, Ciidamada Hubeysan ee dalka Philippines (AFP), oo ku hawlgalay warbixin laga helay labo qof oo Filibiin ah, waxay qaadeen weerar waxayna dileen Solaiman. Hawlgalkan wuxuu ahaa mid lagu guuleystay waxaana suurageliyay in la adeegsado macluumaadkii ay shakhsiyaadkan siiyeen ciidanka Philippine. Dhammaan macluumaadka iyo gargaarka ay bixiyeen shakhsiyaadkan waxay aad u anfaceen in la helo, la dilo iyo kaddibna la aqoonsado Abu Solaiman. Sidii geesinimada

lahayd ee ay taageero uga geysteen darteed, waxaa dadkii reer Filibiin ahaa la siiyay abaalmarin guud oo gaaraysa \$5 milyan (245 milyan oo beesos) oo ay Dawladda Mareykanka ku siisay xaflad uu Safiirka Mareykanka ee dalka Filibiin u fadhiya uu ku qaban qaabiyay jasiiradda Jolo 7-dii Juun, 2007.

Waxaa horrantii 1990-dii Kooxda Abu Sayyaf aasaasay Abdurajik Janjalani, oo ah walaalkii ka weynaa Khadaffy Janjalani. Abdurajik Janjalani ayaa Afqaanistaan kula kulmay Usama bin Ladin oo iminka dhintay marki uu la dagaallamayey Soofiyeetka waxaana ku dhalatay in uu dalka Filibiin ka aasaaso dhaqdhaqaaq goosad oo Islaam ah. I Tan iyo 1990-yadii, ASG waxay dhowr weerar oo qaraxyo bam ah ku qaadeen hanti ay leeyihiin Mareykanka iyo Filibiin. Dhowrkii sano ee la soo dhaafay, waxay kaloo ASG ka dambeeyeen dhowr hawlgal oo dad lagu afduubay si ay lacag u helaan, waxayna bartilmaameed ka dhigteen ganacsatada deegaanka iyo dad dalxiis ku jira. Wasaaradda Arrimaha Dibedda Mareykanka waxay ASG ku tilmaantay in ay tahay urur argagixiso oo ajnabi ah oo weli khatar ku ah xasilloonida dalka Filibiin.

Abu Solaiman wuxuu ka mid ahaa hoggaamiyeyaashii ugu sarreeyay ee Kooxda Abu Sayyaf, oo ah koox Islaamka xag-jirka ah oo ka hawlgala dalka Philippines. Intii uu ahaa madaxa hawlaha iyo saadka ASG, Solaiman, iyo Khadaffy Janjalani, waxay ka mas'uul ahaayeen afduubyadii iyo dilkii loo geystay laba qof oo ay jinsiyaddoodu ahayd Mareykan iyo Filibiin. Waxaa lagu eedeeyay afduubyadii Martin iyo Gracia Burnham iyo laba qof oo kale oo Mareykan ah. Wuxuu kaloo Solaiman ka qayb qaatay madax gooyadii lagu sameeyay Guillermo Sobero, oo ahaa qof kale oo Mareykan ah. Solaiman mas'uul kama ahayn weerarradaan oo kaliya wuxuu kaloo ka qayb qaatay qorshaha iyo fulinta weerarro badan oo lagu qaaday danaha Mareykanka, waxaana ka mid ahaa weerarradii lagu qaaday Safaaradda Mareykanka ee Manila iyo Superferry 14 iyo qaraxyadii bamka ee Valentines Day, oo ay guud ahaan ku dhinteen ama ku dhaawacmeen dad aysan quseynin.

16-kii Janaayo, 2007, Ciidamada Hubeysan ee dalka Philippines (AFP), oo ku hawlgalay warbixin laga helay labo qof oo Filibiin ah, waxay qaadeen weerar waxayna dileen Solaiman. Hawlgalkan wuxuu ahaa mid lagu guuleystay waxaana suurageliyay in la adeegsado macluumaadkii ay shakhsiyaadkan siiyeen ciidanka Philippine. Dhammaan macluumaadka iyo gargaarka ay bixiyeen shakhsiyaadkan waxay aad u anfaceen in la helo, la dilo iyo kaddibna la aqoonsado Abu Solaiman. Sidii geesnimada lahayd ee ay taageero uga geysteen darteed, waxaa dadkii reer Filibiin ahaa la siiyay abaalmarin guud oo gaaraysa \$5 milyan (245 milyan oo beesos) oo ay Dawladda Mareykanka ku siisay xaflad uu Safiirka Mareykanka ee dalka Filibiin u fadhiya uu ku qaban qaabiyay jasiiradda Jolo 7-dii Juun, 2007.



Waxaa horrantii 1990-dii Kooxda Abu Sayyaf aasaasay Abdurajik Janjalani, oo ah walaalkii ka weynaa Khadaffi Janjalani. Abdurajik Janjalani ayaa Afqaanistaan kula kulmay Usama bin Ladin oo iminka dhintay marki uu la dagaallamayey Soofiyeetka waxaana ku dhalatay in uu dalka Filibiin ka aasaaso dhaqdhaqaaq goosad oo Islaam ah. I Tan iyo 1990-yadii, ASG waxay dhowr weerar oo qaraxyo bam ah ku qaadeen hanti ay leeyihiin Mareykanka iyo Filibiin. Dhowrkii sano ee la soo dhaafay, waxay kaloo ASG ka dambeeyeen dhowr hawlgal oo dad lagu afduubay si ay lacag u helaan, waxayna bartilmaameed ka dhigteen ganacsatada deegaanka iyo dad dalxiis ku jira. Wasaaradda Arrimaha Dibedda Mareykanka waxay ASG ku tilmaantay in ay tahay urur argagixiso oo ajnabi ah oo weli khatar ku ah xasilloonida dalka Filibiin.

### **10-KA FURE EE GUUSHA (10 KEYS OF SUCCESS)**

Waxaan jeclaystay inaan walaaladayda la wadaago **10-Kan Fure ee Guusha** taas oo haddii aad barataan kugu dhiiri galindoona wax kugu adkaa oo aad ka cabsan jirtay ama aanad ogay in uu yahay waxa dib kuu dhigaya.

Haddaba waxyaalo badan way inoo qabsoomeen oo ay ka mid tahay Cabsida iyo Cibaadada alle balse ilaa hadda waxaa inagu adag inaan wax walba oo aan u baahanahay aan qabano waxaana inaga hortaagan Cabsi iyo Khajilaad, kuwaasina waxa ay dib inooga dhigeen Guusheenii.

Sidaadarteed, waxaad isku daydaa bal marka hore hal qodob inaad si fiican uga fahanto haba ahaadee kan adiga kuugu daran eed la liidato'e, kadibna baro oo ka fagow (**Waxaa la yidhi Dadaalaa Xaaji Caabaas wuu gaadhaa Dhaafaana**) Marka hore haddaanay kugu jirin inaad dadaasho waxaan hubaa inaad go'aansan meesha aad rabto inaad gaadho, haddaba marka hore dooro Hadaf iyo ujeedo aad rabto inaad ka midho dhaliso, kadibna alle isku xidh, Furayaashana isticmaal waxaan hubaa inaad Guul gaadhi karto'e.

1. Qaado Fursad- Dhammaan Noloshu waa Fursad.
2. Noqo Qof Xamaasad leh, ama shucuur leh- Haddaad adigu rabto inaad noqoto Qof Xamaasad leh- Falgali Xamaasada.
3. Baro sida aad u jeclaan lahayd Shaqadaada- Qabo waxaad jeceshahay- Jeclaw waxaad qabanayso.
4. Baro khalalaad kaaga- Horumari Guusha wixii kaa baaqday.
5. Ha cabsanin!- Wax qabad la'aantu waa noocyo cabsida iyo shakiga ka mid ah.
6. Baro kala mudnaanta- Samee isticmaalka ugu fiican wakhtigaaga.
7. Qabo shaqooyin adag marka hore- Shaqooyinka fududi waxay daryeeli doonaan naftaada.

Guusha

8.Ku adkaysigu waa tayada ugu joogtada badan hoggaaminta Guusha.

9.Waxaad go'aansataa Farxadaada- Taasoo ay xukumi doonta Maskaxdaada.

10.Xusuusnow shay kasta oo aad qabanaysaa wuxuu dirayaa fariin. Go'aanso fariinta aad rabto inaad u dirto Adduunka.

## **Hanashada Guusha Nolosha**

Nolosha qofka ibna adamka ah waxay ku salaysan tahay waxyaalo aad u badan. Sidaasi oo ay tahay qof walba oo ku dul nool gagida aynu ku dul uumanahay wuxuu ku taamaa oo uu jecelyahay in uu helo nolol aad u macaan isla markaana leh dhud iyo dhadhanba.

ruux kastaa si uu ugaadho nolosha guusheeda wuxuu ka fakaraa si uu u hanan lahaa wax kasta oo uu ku gaadhi karo nolosha sareedadeeda. Hadaba waxaan shaki ku jirin qof kasta inuu dhinac ka eego ama uu ka baadi goobo guusha uu ku taamayo.

Marka aynu ka hadlayno umadda somaliyeed meelkastay ku noolyihiin waxay ka raadiyaan badhaadhaha nolosha in ay cagaha saraan dhulal shisheeye sida Europe, America iyo Australia.

Haddaba su'aasha u baahan in si qoto dheer oo waayo arragnimo leh looga jawaabo waxay tahay Qofku siduu ku hanan karaa nolol sareedo barwaaqo iyo badhaadhe leh labadaba?

Waxaynu isku dayi doonaa suaasha inaynu dhinacyo badan ka eegno isla markaana umadda u irdo furno siyaabo kala duwan oo lagu gaadhi karo hadafka nolosha ee loo loolamayo yar iyo waynba.

Dadka badankoodu markay damcaan inay nolosha guul ka gaadhaan waxa markiiba maskaxdoda kusoo dhacda inay helaan Lacag, Guri, Gaadhi iyo Gabadh taas oo sababtay in

Guusha

ay ka baadi goobaan dhulal shisheeye oo lagu tuhmayo nolol ka sareedo badan tan lagu uumay.

Haddaba xaqiiqada dhabta ahi waxay tahay qofku inuu yeesho hami aad u fog sido kale inuu yeesho IL wax ka aragta meel ka baddan dhulka iyo cirku intay isu jiraaan. Hamigaaga iyo aragtidaada oo dheeraataa waxay sabab u tahay in waayo aragnimadaadu badato isla markaana aad abuuri karto fakar aad ku hormarin karto deegaankaaga kana dhigi karto meel ka nolol macaan kana raynrayn badan dhulalka shisheeye ee hamigaagu ku maqanyahay.

Jim Rohns: waa aqoonyahan maraykan ah, waxa uu leeyahay saddex siyaabood ayaad ku hanan kartaa guushanolosha.sido kalena marka aad u bahantahay inaad nolosha guul ka gaadho waa inaad ku guulaystaa saddex dan qodob.

\_ In aad ku guulaysatid kobcinta iyo kor u qaadida mugga aqoontaada. Markasta oo aad aqoontaada kobcisid waxaad kusii siqaysaa inaad u dhawaato guusha noloshaada.

\_ In aad noqoto dhaqaale ahaan qof ku tiirsan shaqaale oo kaliya balse aad noqotaa qof ku tiirsan maxsuulka ay soo saarayso aqoonta maskaxdaada ku kaydsani. Taasina waxay sababaysaa ama ay keenaysa in aad noloshaada guusheeda hantido.

\_ In noloshaadu ay ahaato mar walba mid leh yool isla markaana subax walba aad kuso toostid saaka intee in leeg ayaad yoolkaagi kusi dari kartaa ama kusii biirin kartaa.

Maddaama oo aynu nahay umad muslim ah waxan isku dayayaa in aan sidoo kale dul istaago diinteena suuban waxay ka qabto kana tidhi guusha iyo sareedada nolosha.

Diinteena suubani waxay ina faraysaa Nolosha aduunyadu idil ahaanteedba inay tahay imtixaan islamarkaana EEBE S.W.T uu ku imtaxaamayo addoomadiisa. Imtixankaasi oo la eegayo qofka jawaabta uu ku jawaabo iyo fal-celintiisa. Hadaba qofka ku guulaystay adunyada waa qofka imtixaanka EEBE sidisa ugasoo baxa sido kalena qofka aakhiro ku guulaystay uu EEBE S.W.T inoogu shegay Quranka kariimka ah.

Oo micnaheedu yahay qofkii laga dhufto naarta oo la galiyo jannada wuu guulaystay.

Halkaas waxa inoogu cad dhamaanba ujeedada uu ilahay ka leeyahay adduunyada korkeeda sido kalena qofka aduunyada ku guulaysta iyo qofka aakhiro ku guulaysta uu qalisanyahay qofka aakhiro ku guulaysta sababtuna ay tahay in adduunyadu ay tahay mid loogu talagalay in addoomada lagu imtixaamo ayna tahay mid aad u kooban.

Haddaba guusha noloshu maaha in aad ka baadi goobto ama aad ka raadiso meel aan kaa fogayn balse waa in aad marka u horaysa niyadaada siisaa kalsooni ay ku garwaaqsato guushu inay tahay mid aad u fudud isla markaana ay tahay mid ku xidhan waxyaabo kooban oo ay awoodo inay naftaadu si buuxda u samayn karto.

Waxan odhan karaa guusha qof waliba wuu kasban karaa haduu la yimaado dhawrkan qoddob:

Guusha

Samir badnaan: samirku waa waxa kaliya ee hoga tusaaleya qofku in uu gaadhi karo guul wakhti aan fogayn hadii uu la yimaado asbaabaha samirka. Isla markaana waa sir uu ilaahay inoogu sheegay Quraankisa kariim ka ah taas oo la tacaluqda ama ku lug leh guusha uu aadamuhu kuu taamo. Samirka waxa kale oo nafta lagu baraa daganaansho iyo karti badnaan uu qofku ku xamilo nolosha adaygeeda.

Daacadnimo: qoddobkani waa lagama maarmaan hadii aad u golangoshay ama aad in badan baadi goobaysay inaad noloshaada guul ka gaadhid. Waa wax dad badani ku hungoobeen, buuxina waayeen. Waa wax lagu qiimayn karo in aad guulaysanayso noloshaada hadii aad la timaado isla markaana aad arki doonto shay aad maskaxda ku haysay aadna kuugu waynaa oo gondahaaga ama agtaada yimaada.

Dhiiranaan: qoddobkani waa mid aad xasaasi u ah isla markaana u baahan feejignaan dheeraad ah. Waxa xaqiiqo ah in qof waliba uu naftiisa la jecelyahay waxa wanaagsan. Sidaasi oo ay tahay waxa dadku ku kala duwanyihiin dhiranaanta iyo hal adayga gaar ahaan marka qofku guul raadinayo. Waayo waa in aad maqashaa durbaanka kaa dhex baxaya sanqadhiisa, sidoo kalena aad rumaysata riyoooyinka joogtada ah ee ku xidhiidhsan waayahaaga nololeed. Waa shay u baahan daganaansho dheeraada iyo talooyin ama xoggo kala duwan oo aad ku jaan goyso, maxaa yeelay mararka qaar wuxuu khatar galin karaa noloshaada bini aadamtinimo si aad guul ugaadho awgeed. Waa waxa dadka qaar ay ugu hodmaan isla markaana ay guul awgeed xakamayn kari waayaan naftoda melo aan ku habonayna ku hodda.

Alle ka cabsi: Alle ka cabsigu waa hidaayo iyo hanuun uu EEBE S.W.T uu ku galado adoomihiisa uu jecelyahay. Waa akhlaaqiyaad wanagsan oo EEBE S.W.T uu ugu deeqo adoomihiisa uu ku sugayo dariiqa toosan. Waa siyaasad uu aadamuhu ku kala dheeraayo isla markaana uu ku kala gaadho sumcad wanaag iyo jacayl badnaan dhan kastaba ah.

Afartaa qodob waxay qofka u suurto galin karaan in uu noqdo qof ka midho dhaliya isla markaana rumeeya aragtidiisa ku aadan inuu nolosha guul ka gaadho.

Wakhti aan sidaa usii durugsanayn bay ahayd markii aan dareemay wax yaabo badan oo noloshayda ah in badan ku taami jiray kuna riyoon jiray aan gaadhay waana guule mahadii, furaha ama sirta aan u adeegsadayna waxay ahaayeen qodobadaas aan kor ku xusay.

Waxaan rajaynayaa in badan oo idinka mid ah in ay guushay ku taamayaan hanan karaan hadi ay isticmalan qodobadan.

Maahmaah English ah baa waxay tidhahdaa: “success is not once a shock” oo macnaheedu yahay guushu maaha wax hal mar soo baxa ama lagu naxo.

### **Talooyinka guusha ee waxbarashada**

## 10 Talo ee guusha waxbarashada

Dr-Hamse Mohamed



- 
1. **Niyad Sami:** Waxaa jiro farqi aad u weyn oo u dhexeeya kaliya inaad shahaado ama imtixaan aad wax u diyaariso iyo inaad si niyad sami leh oo aad u diyaariso, qofka markuu u niyad san u haayo waxa uu qabanaayo shaki kuma jiro inuu ku guuleeysanayo. Noqo qof niyadsan.



2. **Hami Sare:** Hami sare waxaan u jeedaa inaad naftaada ku xakameeyso dhibka eey leedahay waxbarashada iyo saacadaha badan ee aad fadhineyso iyo wax akhrinta tirada badan , markaad wax akhrineyso waa in aadan dareemin caajis iyo hurdo oo aad u dul qaadato waayo waxaad leedahay hami sare.




3. **Jawi dagan ku akhri:** Ka fogow jawiyada qasan ee buuqa leh sababtoo ah waxeey mashquulinayaan maskaxda. Hadii aad asxaabtaada duruusta isla akhrisaneeysan u sheeg ineey jawiga dajiyaan oo eeysan buuqin.




4. **Nidaami Waqtigaaga:** Sameeyso jadwal aad duruusta ku akhrisato oo leh maalmo iyo saacado adigoo ku cadeeynay cashirada aad rabto inaad akhriso saacad ama maalin hebal kana dhig jadowalkaan mid nolashaada ku dabaqan.



5. **Sameeyso waqti aad ku nasato:** Nafsada xaqeeda sii oo saacado badan ayaad wax akhrineysay sidoo kale maskaxda waa ineey dagtaa waayo xili fara badan ayeey shaqeeyneysay.



6. **Akhri Buugaag ku saabsan taariikhda:** Buugaagta taariikhda waxaad ka ogaaneysa waxyaabo badan sidookale buugaagta taariikhda waxeey kugu dhiiri galinayaan inaad wax badan akhriso waayo buugaagta waxeey ka kooban yihiin safxado badan.



7. **Ha welwalin wax walbo oo dhaca:** walwalka faa'iido malaha xitaa waxaa suurta gal ah in aad xakameyn weyso duruustii aad soo akhrisay oo eey dhacdo ineey isaga kaa dhax yaacaan. Laakin xasuuso tala saarashada ALLE.



8. **Socodka Joogtee:** maalin walbo soco ugu yaraan 30 Daqiiqo waayo socodka waxaa laga helaa firfircooni jireed. Socodkana ma aha aalamiitada ku daalineeyso.



9. **Mobile-ka Gacanta Iska Dami:** Inta aad ku guda jirtid akhrinta cashiradaada mobileka iska dami ama cod-ka ka xir waayo wuxuu ka midyahay waxyaabaha bini aadanka mashquuliya.



10. **Duco:** Ducada waa muhiim ALLE ka bari inuu kuu fududeeyo waxbarashada aad ku jirto sidookale waalidkaa ku dheh ii duceeya gaar ahaan hooyada ducada hooyada waa arin aad u cajiib ah.

Dadaal Wacan

### **Ka adkaan-shiyaha Naftu Waa Furaha Guusha**

waxa laga yaabaa in mashaakilka iyo dhibaatooyinka haysta qofka ay ka bilaabanto naftiisa intaanay cid kale is arag, kadibna ay u gudubto dadka ku hareeraysan, taasina waxay markaste ka timaadaa in uu qofku awood u yeelan waayo sidii uu naftiisa uga adkaan lahaa.

Dadka badiyaaba nafahooga ka adag ayaa waxay kaligood awood u leeyihiin inay si dagan ula dhaqmaan dhibaatooyinkooda, qofkaste oo awood u yeesha inuu naftiisa xakameeyona waa qof is ku filan, waxa uu leeyahay iimaan adag iyo kalsooni uu iska qabo oo u sahlaya guul kaste oo uu ku hammiyo.

Hadaba daryeelmagazine.com waxay idiin soo gudbinaysaa 10 arimood oo kuu fududaynaya sidii aad uga adkaan lahayd naftaada.

## Guusha

1. Naftaada ku khasab inaad akhridid muddo cayiman maalin kaste, tusaale ahaan aynu nidhaahno waxaad ka bilawdaa inaad 30 daqiiqo akhridid, halkan ayaad ka bilaabi kartaa inaad naftaada ku khasabtid wax akhris duruuf kastaaba ha kugu hareeraysnaatee.
2. Naftaada ku khasab inaad tukatid 5-ta salaadood ee maalinkaste, si kastoo ay duruufu ahaataba xataa markaad caajis dareemayso waa inaad tukataa, waxa ku jira arinkan laba faadio, inaad ajar ka heshid markaad gumatid waajibka Allah ku faray, iyo inaad naftaada edeb ugu samaysid salaada.
3. Seexo saacad xadidan maalin maalmaha kamid ah oo cayiman, tusaale ahaan aynu nidhaahno waxaad seexataa maalin kaste oo salaasa ah 9 habeenimo, waxaana waajib kugu ah inaad marka aad xadid maalinta iyo saacada aanaad ka bixin ballankaa aad naftaada la gashay.
4. Naftaada ku khasab nooc kamid ah cuntada maalim cayiman, tusaale ahaan ha cunin khudaar maalinta arbacada, si kaste oo aad u heli kartid khudaartaas.
5. Soco muddo 10 daqiiqo ah maalinkaste, mudadu ma dheera laakin naftaada ku khasab inaad socotid muddadaas maalin kaste si kaste oo waqtigu kuugu yaraado.
6. Kasoo bax gurigaaga adigoo mobile-kaaga sidan masafo cayiman, halkan ayaa aad naftaada kula galaysaa dagaal, iyada oo aad ka warwaraysid mobile-kaaga iyo yaa kusoo wici doona gaar ahaan hadaad tahay dadka shaqada badan, balse hadii aad muddo sidaas ku wado waxaad arki doontaa adiga oo naftaada kasoo adkaanaya, wiigiiba mar tijaabi arinkan kadibna natiijada fiiri.
7. Daawo barnaamij caajis ah (boring) muddo 10 daqiiqo ah.
8. Samee shaqo aad hore uga qaban jirin guriga, sida inaad samayso jimicsi, amaba aad nadiifsid gurigaaga si kate oo shaqaale hawshan loo xil saaray uu u jiro.
9. Isku day inaad qortid waxaad la kulantid maalin kaste, samee sidan muddo bil ah adigoo ku qoraya buug u gaar ah.
10. Diid wax aad jeceshahay inaad qabatid todobaad kaste maalin kamid ah, tusaale ahaan haad taha dadka jecel inay Cemina-ha tagaan wiig kaste jooji todobaad kamid ah todobaaddada inaad tagtid sinimooga, hadii aad todobaadka ku xiga aragtid xalwad aad jeceshahay naftaada u diid inaad iibsatid.



## **Maxaad naftaada Ku Horumarin Karta**

Waan idin Salaamay Dahamaan-tiinba Akhristow Meelkasta aad joogtaanba. Inta aan maqaalkan bilaabin Kahor waxaan jeclaan lahaa in aan inyar idiinka iftiimiyo Waxa igu kalifay in aan ka faaloodo arintan Kor Ku xusan taas oo ay sabab u tahay,

markii aan arkay in Bulsha waynta somaliyeed, Gaar ahan dhalinyaradda ama qofkasta oo jecel in uu naftiisa dhiso , ama uu horumariyo si uu u noqdo qof maamuus leh, sidaas darteed waxaan jecleestay in aad ila wadaagtaan 10 steps oo aan is idhi hadii uu qofka raba in uu Naftiisa Horemariyo uu ku dhaqmo gaadhi doono Goalkiisa ama Hadafkiisa Horumarineed, Qodobadiina waa Sidan:

1. Samayso ama Dhiso xiriir wanagsan bulshada kugu xeeran, si ay kuu garab istaagaan marka aad la kulantid caqabad, ama aad u baahatid.
2. Markasta ku dadaal in aad naftaada ka dhigtid mid daacad ah oo dibicsan.
3. Isku day in aad dhoola cadaysid ama aad weji furfurnaatid marka aad ku dhexjirtid bulshadda.
4. Baro ashyaa cusub Maalin kasta, si aad u korisid maskaxdaada, adigoo badsanaya dalxiisyada, daawashaada televisionada waxbrashadda ama taariikhda ka warama, iyo idacadahaba. si aad additional Knowledge u heshid.
5. Isku day in aad ku Qanacdid waxa yare e aad nolosha ku haysatid, ee uu Eebe “**Subxaana watacaalaa Kusiiyaya**” Si laguugu Kordhiyo uguna gaadhid Galadda wayn, Badsana samirka si noloshaadu u sinaato.
6. Ha isku dayin weligaa in aad Xiriir Baa-biisid, balse isku day weligaa in aad xiriir sanaysid, waayo xiriirkasta oo samaysid waxa uu ka qaybqaadanayaa Cimri dherrerkaaga.
7. Badso Hadalada Kiisa Wanaagsan, Yaraysana Hadalada kiisa Qalafsan, si aad u noqotid qof la xiiseeyo.

Guusha

8. Weligaa Hore usoco, wixii tagay way tageen, waxa manta joona waa waxaad qacanta ku haysid, Mustaqbalka wixii aad heli lahydna waa murayadii beri.
9. In aad tidhaahdid “MAYA” maahan wax xun, Maya macnaheedu waxa weeyaaan in aadan adigu ku qanacsanayn xaalad, taas macnaheedu maahan in aad u isticmaashi Rule ka #2 ee aanu kor ku soo sheegnay in aad fikirkaaga ku afkeeb qabatid.
10. Xasuuso weligaa sadex waxyaalood: waxqabadkaaga, Rajadaada, iyo Guushaadaa, Waayo waxqabadkaagu waxa uu ka turjumayaa Dhiiri gelintaada, Rajadaadana waxa ay ka turjumaysaa Hamigaaga nololeed, Guushaadu waxa ay ka turjumaysaa Nasiibkaaga kiisa wacan.

Hadaba Akhristoow Hadii aad Tahay qof Jecel in uu Naftiisa Horemariyo am uu noqdo qof ay bulshadu wada jecelyihiin , oo noloshiisa development waxa loo yaqan ku sameeya qodabaadan kor ku xusan ku dadaal.

Gabagabadii maqaalkayga oo noqondoona mid taxanaa aanan uga hadlidoono insha alah nolosha qeebheeda kala duwan sida(Siyaasada, Waxbarashada,guurka,jacaylka,iyo sida uu qof kasta oo inaga mid ah u dhisi karo noloshiisa hadaba heerka uu karaba isagoo marnaba ka tagayn Tawakalka Ale.

**SIFOOYINKA DADKA GUULEYSTA**



**Guusha ay naftooda la jecel dadkana way la jecel yihiin:** Majiro aduunkan qof kaligii meel iska taagan, cid kasta waxay ku abtirsataa Qoys, Ehelo iyo asxaab agtooda ka ag dhaw, haddii ay iyaga kaliya guul gaadhaan oo cida ku hareeraysana aaney la dareemin farxadaa iyo reyn rayntaa waxba uguma taalo guushaasi waa hubaal, haddaba waxa ka mida sifooyinka dadka ku guuleysta aakhiro iyo iftiinkaba iney yihiin kuwo farxadooda iyo ta bulshada kale isku xidhan tahey.

Waxey sameystaan Qorshayaal cad cad oo ay nolohsooda ku hagaan: inaad qorshe yeelataa waa waxa kugu haga guusha, qorshuhuna waa halka laga istaadho gaadhiga nolosha ee aynu saaranahey, hadaanad aqoon saneyn wadooyinka aad marin doonto baabuurkaa waa hubaal oo meel aan meel ba aheyn buu gabalku kuugu dhici saliida iyo biyuhuna kaaga dhamaan.

Waxey si dhameystiran u qaadaan mas,uuliyada khaladaadkooda: waligeedba waa la yaqanaa iney dadka fashilka badani saaraan eeda khaladaadkooda cid kalle amaba agabka ay adeegsanayeen, waa inaad ku dhiirataa inaad khaladka adigu ka masuul tahey kuna dadaashaa inaanu soo noqnoqon, insaanbaynu u nahey khaladka iyo gafka wax ceeb ahina kuma jirto haddey wax kaa qaloocdaan.

**Way saamaxaad badan yihiin:** khalad kasta oo laga galo waxey kaga talaabaan saamaxaad iyo laab xaadhnaan, taas oo u horseeda iney ixtiraam iyo wanaag ka kasbadaan bulshada ay ku dhex noolyihiin.

waxey amaanaan wax qabadyada dadka kale: inaad qofka u quudho waxii wanaaga ee uu muteysto ood ku amaanto si qalbi furnaan ah waxey kugu rideysaa wadada ah inaad tahey qof guuleysta bulshaduna jecshahey, halka haddii aad wax kasta oo la qabto dhaliil ku sheegto il gaar ah lagugu eegi doono kama danbeystana aad noqon doonto tuke baal cad.

**farxada ayey balaadhiyaan:** tani macnaheedu waxa weeye cidii ay gacan siin karayaan si ay guul u gaadhaan way siiyan, si farxadu ugu baahdo bulshada. Bulsho wanaag iyo kalgacal kuwada nool in la helaa waa wax qaali ah, kaliyana waxa lagu gaadhi karaa in lays garabsado oo gacmaha lays qabsado.

**Wax akhris ka ayey joogteeyaan:** akhrisku waa muhiim, nolosha qofkana wax badan ayuu kabadelaa waana calaamad lagu garto qofka horumarka iyo guusha jecel. Maah-maah carbeed ayaa tidhaahda “markastoo akhriskaagu baden yahey aragaagu wuu dheer yahey” aragu kii indha maahee u kaadi, waa kii maskaxda “Indheer garad”

Wax bixin joogto ah: naftadooda uun uma shaqeeyaan ee gacantoodu waxey u furan tahey kuwa aan waxba haynin iyo gargaarka bulshada, ka qeyb qaadashada hawlaha ka socda bulshada dhexdeeda iyo wixii la hal maala.

Wax barasho joogto ah: kama caajisaan waxbarashada ha noqoto tu toos ah iyo tu dadban midey doontaba, waagii baryaba waxey diyaar u yihiin iney kasbadaan cashar cusub oo wax tar u leh naftooda iyo bulshadaba.

Dadka ayey la wadaagaan khibradooda si looga faa,iideysto: bakheyilku maaha ka xoolaha uun bakheyla ee cilmiga iyo caqligana waa la bakheylaa, haa!!! Waxa jira boqolaal la god gala cilmigii ay lahaayeen iyagoon qofna alif uga sheegin.

Isbadelka ayey hore ula qabsadaan: haddii aanu isbadelku caqabad kugu aheyn waa hubaal waxaad ka mid tahey kuwa guuleysta, iney noloshu is badashona waa calaamad horumar sheegaysa, “**Bartii Yaqaan Bari uma korodho**”.



guushu waa wax aad uga balaadhan eray qudh ah, guushu waa ka midho dhalinta dhamaan himilooyinkaaga, waa ku guulaysiga hadafyadaada waana wadada kugu hogaamisa farxadda, guushu ma ahan wax ku timaada bil iyo labo toona sababtoo ah waa wax aad u qaaliya waxayna u baahan tahay dedaal aad u badan iyo shaqo adag, balse waxaa laga yaabaa adigoo samaynaya dedaal aad u badan inaad kaga tagto meel dhexda ah inaad rajo dhigto ama aad la deris noqoto jiyad jab, dhamaan waxyaabahaani waa wax kugu dhici kara haddii aanad lahayn dabeecada iyo hab-dhaqanka ay leeyihiin dadka guulaysta maadama guushu tahay wax khaas waxaa gaara dad khaas ah. balse ha werwerin sifooyinka ay guushu u baahan tahay wa kuwo aad baran karto xitaa haddii dabeecadahaagu yihiin kuwo aad uga fog sifooyinka guusha.

guusha iyo dabeecadaha ay rabtowadada guusha waxaa mara oo kaliya dadka xoogga u leh inay u adkeystaan caqabadaheeda. wadadaan waxaa ka buuxa diidmo lagaaga hor yimaado niyad jab, xanuun, qoomamo, guuldarro iyo xitaa murugo.

Guusha

## **Guul-darrada**

si aad u gaadho wadadaan dhamaadkeeda waa inaad noqoto qof u dhoolacadeeya guuldarrada. guuldarrada waa inaad u tixgelisaa inay ka mid tahay nolol maalmeedka caadiga ah, waa inaanad argixin oo aanad ooyihin marka ay kula soo deristo guuldarro balse waa inaad u dhoolacadaysaa sii wadaa socdaalkaaga.

## **Diidmada**

diidmadu waa inay noqotaa saaxiibka kuugu dhow. waxaad diidmada kala kulmi kartaa saaxiibada qofka aad u shaqayso, dadka ama xittaa aduunka oo dhan. waa inaad adkeysii u yeelataa diidmo kastoo aad la kulanto aanad noqotaa mid u dhoolacadeeya siina wata socdaalkiisa.

## **Niyad jabka**

niyad jabku waa inuu noqdaa saaxiib kaloo aad ku xisaabtanto hadii aad tahay qof hansare leh niyad jabkuu wuxuu kusoo booqan doonaa in ka badan inta uu booqdo dad kale. guushu waxay u baahan tahay qof adkeysii u leh inuu ka gudbo niyad jab kasta oo soo waajaha, dib u heegan geliya ciidankiisa, beddela xeeladiisa horena u socda.

intaas waxaa dheer in qofka guulaysta oo yahay kan qaada masuuliyadiisa, qof guulaysta ma ahan kan yiraahda waan guuldarreystay isagoo u aanaynaya nasiibkiisa, duruufaha iyo deegaanka ku xeeran balse waa qof aaminsan ilaahay, ku kalsoon naftiisa, kalsooni buuxdana ka haysta in mustaqbalkiisu ku jiro gacmihiisa.

guushu waxay uu baahan tahay qof u dhoolacadeeya dareennada xunxunka uu waajihi doono isna aan u tix gelin masiibo ku habsabsatay balse u tixgeliya nolol maalmeedka caadiga ah.

qisadaan waxaan u soo qaadannay sifooyinka ay mu'iniintu ku doortaan geyaankooda inaan ogaanno, maadaama nabi muse cs iyo gabadhii xishoodka alle ku tilmaamay oo shiikhu dhalay ay isku doorteen sifooyinkaas wanaagsan oo gabadhu sheegtay, labada

gabdhoo tii weyn bay ahayd tan loo diray oo la siiyey, sida loo badinayo, xeerka iyo nadaamkuna yihiin.

nabigeennuna scw wuxuu noo sheegay in haweenka loo guursado dhawr ujeedo oo loogu xisho: waa quruxda, maalka, magaca iyo diinta, wuxuuna kula taliyey qofka mu'minka ah inuu midda diinta leh doorto si gacantiisu u guulaysato. taasina waxay sii caddaynaysaa inay guushu ku jirto inuu qofku xusho qof diin iyo dhaqan wanaagsan leh oo birri gurigiisa iyo ubadkiisa liibaan u horseedda oo dhaqan khayr keena.

sidoo kalana wuxuu nabigeenu scw ummaddiisa kula dardaarmay dadka gabdhaha dhalay haddii uu u yimaado nin ay ku yaqaannaan diin iyo dhaqan wanaagsan inay gabdhahooda siiyaan, gabadhu waa inaysan diidin haddii aabbeheed u dooro nin uu dhaqan wanaagsan ugu dooray oo geyaan u qalma ah, nin uusan aabbaheed xoolo ka rabin ee uu doonayo inuu xataa isagu wixii awood ah kaalada uga qayb qaato haddii uusan markaas wiilku bixin karin.

nin kasta oo waxgarad ah waxaa la gudboon inuu gabdhihiisa u doono oo u sahamiyo nin wanaagsan oo uu hubo inay ku liibaanayaan oo ku dagayaan, inuu qofku lacag leeyahay ma aha waxa farxadda iyo guusha guurka lagu gaaro, intee baa dad lacag leh guurkoodii fashilmay ay murugo ku kala tageen; waxaa guusha lagu gaaraa daacadnimada iyo diinta, wiilka daacadda ah ee diinta leh xaaskiiga ma dhaqan waayin mana biilan waayin, maxaa yeelay wuxuu garanayaa masuuliyadda iyo xilka saaran, dhinaca kalana intuu rabbigiis caabubo oo salaadda subax jamaaco ku tukado buu alle risiq wanaagsan weyddiisanayaa dabadeedna dhulka alle ayuu ku faalalayaa isagoo risiq raadis ah, allana ma qadinayo, oo alle weyne wuxuu yiri:

**“Reerkaaga salaadda far oo kula samir, risiq ku weyddiin maynno oo annagaa ku irsaaqaynee, cirib dambeedkana taqwadaa lehe” daaha 132**

wakaas alle weyne kor ahaaye noo sheegayaa qofka rabbiyaqaanka ah oo ehelkiisa salaadda amra oo kula samra ku dhiqidda diinta oo salaaddu u horreyso inuu alle irsaaqayo oo isaga laga rabo inuu asbaabta la yimaado oo intii karaankiisa ah dadaalo, qofka shanta salaadood jamaacada masaajidka kula tukada kitaabka allana akhrista, reerkiisana khayrka ku ababiya meeshii uu u dhaqaaqo khayr buu alle ka siinayaa insha allah, oo waa mujarrab la ogaaday.

dhibaatudu waxay ka imaanaysaa markii qof walba uu iska qaayibay qof shayddaan u qurxiyey oo aan dhaqan wanaagsan iyo diin fiican lahayn, oo hadallo hodaal ah kan kale ku hoda ama qof aan laba aqoon oo hadallo qurux badan iyo sawirro la dhalaaliyey qofka kale ku indha sarcaadiya oo waa ku jecla-

Guusha

hay iyo waa kaa helaa hadal uga bilaaba, maxaa la isku jeclaaday weliba la isma barane, xataa qof salaad badan oo diin ka muuqato ilaa dhaqankiisa dhabta ah la ogaado waa inaan muuqaalka kore lagu dagmin, maxaa yeelay waxaa jira dad diinta yaqaan oo cibaado badan laakin aan dabeecad wanaagsan lahayn oo dadka cadaab ku noqonaya, marka waa in qofka dhaqankiisa dhabta ah la soo sal xaaraa, oo qof lagu kalsoon yahay oo yaqaan la helaa, haddii aan fursad lagu barto muddo dheer la helin.

soomaalidu waxay ku maah-maahdaa qof **aadan jid la marin ama jabad la gelin ama jadiin la wadaagin ma baran kartid.** waa in aad qofka safar la gashaa oo dhib isla martaan dadka dhibaatada ayaa lagu kala bartaa, ama aad daris la noqotaa, darisku waa kuwa isu baran og dadka maxaa yeelay waa iska warhayaan, qofku muddo kooban buu is qarin karaa ee haddii aad muddo daris ahaataan waad baranaysaa xaqiiqadiisa oo dhan, oo soomaalidu waxay ku maah-maahdaa dariskaagu waa ilaalo aan lagu dirin, sidoo kale waxaa qofka lagu bartaa inaad jadiin la wadaagtid oo laga wado in xoolo idin dhex maraan macaamil xagga dhaqaalaha ah.

cumar binul-khaddaab allaha ka raalli noqdee baa nin ku yiri: ii keen nin ku yaqaan, suu wuxuu keenay nin masaajidka kula tukada oo ay halkaas isku barten, markaas ayuu weyddiiyey waxa uu ninkaan ka yaqaan iyo halka ay isku barten, markaas ayuu u sheegay inuu masaajidka ku bartay iyo salaadaha; markaasuu ku yiri: mindhaa waxaad aragtay isagoo salaadda foorarsanaya laakin xaqiiqadiisa kale ma taqaannid, markaas ayuu ninkii ku soo jeensaday oo ku yiri: orod nin ku yaqaan noo keen. nabiguna scw wuxuu is raaciyey qof aad u bogteen diintiisa iyo dhaqankiisa, marka waa in labada shuruudood uu qofku yeeshaa, diin wanaagsan iyo dabeecad iyo dhaqan wanaagsan.

taas macnaheedu waxa weeye qofka waa in dhaqankiisa dhabta ah la helaa oo muddo lala noolaadaa, maxaa yeelay masaajidka qof walba waa is dhawrayaa oo dabeecaddiisa runta ah laguma ogaan karo. marka waa inuu qofku iska hubiyaa qofka uu geyaanka ka dhiganayo oo doonayo inuu nolosha la wadaago, oo ay qoys wada amaamudaan oo ubad wada ababsadaan, waa inuu wiilku iska hubiyaa hooyada ubadkiisa ee birrito, gabadhuna waa inay iska hubisaa aabbaha ubadkeeda ee birrito haddii alle idmo.

soomaalidu waxay ku maah-maahdaa wiilkaagu habeen buu hiil kaaga baahan yahay, waa habeenka aad hooyadiis dooranaysid, diintuna sidaas oo kale ayay tiraahdaa.

waxaa kale oo geyaanka laga darsi karaa dhaqanka waalidkiisa soo ababiyey oo raad ku yeelan kara, inkastoo uu qofku wax iska beddeli karo oo labada dhinac mid u leexan karo, haddana inta badan gurigii uu ku soo ababay iyo dhaqanka waalidkiis iyo walaalihiis waa in la iska hubiyaa maxaa yeelay qudhoda birri waa is mudanaysaan oo xidid baad noqonaysaan. haddii uu qofkaasi ka soo jeedo reer wanaagsan oo dhaqan fiican iyo diin leh, qiimihiisu waa korreeyaa oo miisaan baa la saarayaa, haddiise uu ka soo jeedo qoys dhaqankoodu diinta ka fog yahay, oo aan fiicnayn qofkaasi xataa haddii uu fiican yahay isagu waxaa fiican in aad looga fiirsado, oo aan si hawl yar lagu gelin.



## Hawsha qoysku waa iskaashi

labadii alle isu qoray oo calafka isku lahayd marka ay gurigooda amaamudaan oo udubkooda la turqo oo reer hebel la yiraahdo, dad iyagaa isu xiga oo is hudhan, xataa labadii dhalay iyagaa markaas isaga sokeeya, oo alle maro iyo hu' buu isaga dhigay, oo waa isku asturay, waalidkood xaqiisa iyagoo aan illaawayn haddana waa inay ogaadaan in iyagana laga sugayo xil la mid ah kii ay waalidkood soo guteen oo ah inay ubad dhalaan koriyaan oo ababin toosan ababiyaan.

maanta iyagay hortaal inay fariintii labadooda waalid iyana sii gudbiyaan oo ubadkooda ku reebaan oo xilkii alle saaray gutaan. alle weyne wuxuu aadanaha ka dhigay kuwo isu hara oo xilka jiritaanka isaga dambeeya, oo aabbe iyo hooyo kasta marka ay ubadkooda koriyaan oo iyaguna gaaraan inay reer abuuraan bay iyagu u diyaar garoobayaan inay dhulkaan ka safraan oo meeshii alle u qoray oo aayatiinkooda ahayd aadaan, maxaa yeelay meeshaani ma aha meel la joogayo ee waa ku meel gaar lagu gudanayo xil alle ina saaray, oo geedkii aan beeranno aan birri mirihiisa guranaynno, haddii uu khayr ahaa khayr buu noqonayaa haddii uu shar ahaana shar buu noqonayaa alle ka magane.

labada isu dhaxaa waa raqba waa ku raggeeda, waa inay ogaadaan inay xanbaareen xilkii iyo aammaanadii abkow adan iyo abooto xaawo inooka horreeyeen, xilkaas oo ah in marka koowaad alle weyne laga dambeeyo oo la caabudo, dabadeedna addoommadiisa xilka inaka saaran aan gudanno, oo ilmo dhallo haddii naloo qoray dabadeedna ilmahaas korinno oo u dadaalno kuna ababinno jidkii alle weyne u jeexay oo tarbiyad wanaagsan ku beerno, si ay birri naftooda, waalidkooda iyo ummaddoodaba u anfacaan. waa inay hawsha qaybsadaan oo sidii alle ugu qaybiyey u kala aadaan, afadu waa inay guriga hawshiisa ku fillaataa oo saygeeda ka hanataa wixii xil ah ee gudaha laga doonayo, sayguna waa inuu foofaa oo wixii alle u diray raadiyaa, isagoo alle kaalmaysanaya oo hiirtii hawl ka bilaabaya inuu masaajidka u dhow salaadda jamaacada ku tukado, dabadeedna intuu adkaarta iyo quraanka akhristo uu risiq raadiyaa, isagoo laabta ku hayaa amarradii alle ee ahaa:

**“markii aad salaadda gudataan dhulka ku faalala oo deeqa alle u raadsada, allana in badan xusa aad liibaanteene”** al-jumuca 10

markii uu xilka salaadda guto waa inuu qofku u kallahaa oo aadaa meeshii uu is leeyahay risiq xalaal ah baad ka helaysaa, nabigeenu scw ummaddiisa wuxuu ugu duceeyey kallahaadda oo wuxuu yiri: “allow ummaddayda kallahaaddeeda u barakee” {**allaahumma baarik li ummatii fii bukuurihaa**}

deeqdii alle inoo qoray waa inaan u soconnaa oo sababta la imaannaa, intaasna waa inaan xusidda alle afka ku haynnaa oo laabta ku haynnaa.

marka ay labada isu dhaxa ay iskaashadaan oo qof walba xilkii alle u diray uu guto ayna u heellenaadaan hawsha reerkooda oo ogaadaan hadba sida ay u dadaalaan inay miraheeda helayaan, oo guusha qoyskoodu ay ku xiran tahay sidii ay iyagu u dadaalaan isuna

## Guusha

kaashadaan oo daacad ugu noqdaan reerkooda, waa inay ogaadaan reerkaan inay labadooda keliyihi leeyihiin oo laga doonayo horumarkiisa iyo hagaajintiisa, inta aysan ilmo yeelan waa inay asaaska reerka adkeeyaan oo gacalnimo aan afgobaadsi ahayn isu hayaan oo aysan cid kale kala tashan xilkooda u gaarka ah.

gabadhu waa inay garataan saygeedu inuu yahay kii ay dooratay oo aayaha nolosheeda ku aammintay, waa inay daacad u noqotaa oo ka dambaysaa wax walba ka hor, dabadeedna ay hawsheeda guriga ka soo dhalaashaa oo ay marka ay cibaadada alle gudato ay ku kallahadaa sidii ay quraacda u diyaarin lahayd, dabadeed guriga u hagaajin lahayd, markii qadada la gaarana ay diyaarisaa, waa inay saygeeda hawsha guriga uga fillaataa oo dharkiisa u dhaqdaa, oo guriga nadiif ka dhigtaa, oon wanaagsanna u diyaarisa, marka uu yimaado isagoo soo daalay oo xammaal ku maqnaana waa inay qalbi furan iyo farxad ku soo dhawaysaa oo daalka halmaansiisaa.

xamna bintu gaxash baa maalintii uxud waxaa loo soo wariyey iyadoo nabiga scw horjoogta oo looga tacsiiyeyey geerida walaalkeed cabdullahi bin jaxash, markaas ayay istirjaacsatay oo te: “innaa lillaahi wa innaa ilayhi raajicuun” saa misna waxaa loo soo sheegay geerida abtigeed xamza bin cabdalmuddalib, markaas ayay sidii oo kale tiri: “innaa lillaahi wa innaa ilayhi raajicuun” saa isla markiiba waxaa loo soo sheegay geerida saygeedii muscab bin cumayr, markaas ayay oohin la dhacday oo hiqlaysay, markaas ayuu nabigeenu scw yiri: “gabadha saygeedu meel buu uga yaal”

waa run oo walaalkeed waa kii la dhashay ooay soo guriga ku soo wada koreen oo waalidka wadaageen, abtigeedna waa gacalkeed hooyadeed la dhashay, oo inkastoo ay wada jeceshahay oo dhibaato u quurin oo ay dartood u murugootay, haddana maanta waxay nolol wadaageen oo ay la noolayd oo nolosha la wadaagtay saygeeda sidaas daraaddeed bay xanuun u gaar ah oo aan cid la wadaagin u dareemaysaa, maxaa yeelay labadooda oo keliya baa dadka iska xigay oo iska hudhanaa oo hoy keliya iyo hu keliya wadaagay, ilmahooda baana soo raacay oo iyaguna la dareemaya xanuunka gaarka ah, aabbe iyo hooyo iyo walaalo waa ku sii xigaan oo xanuunku waa gaarayaa laakin waa la sii kala daran yahay oo la sii kala xigaa.

waxaa xaqiiqo ah inay xanuunka u weyn dareemaysto maxaa yeelay garabkeedii baa bannaanaaday oo sarriirtii bay keligeed ku noqotay oo lammaankeedii gacalka iyo garabka u ahaa bay weyday, oo albaab baa ku soo furmay oo geyraa ku daacay, marka waa hubaal labada is qaba haddii midkood qaddartii alle u timaaddo inay musiibo ku dhacday ayna la gudboon tahay inuu alle darti u samro, oo alle weyddiisto inuu musiibada ka ajar siiyo wax dhaamana u dhaafiyo.

sayguna waa inuu ogaadaa gabadhaan uu guursaday inay isaga isku soo aammintay oo nolosheeda u soo dhiibtay oo reerkoodii ka soo raacday, waa inuu ka fakaraa daryeelkeeda iyo xannaanadeeda, waa inuu ogaadaa inuu xilka weyn iyo masuuliyadda reerku isaga saaran tahay, oo isaga laga doonayo, gabadha biilkeeda, arrad-tirkeeda oo sannadkii laba jeer ah, daawadeeda iyo daryeelkeeda oo dhan, waa inuu ogaadaa inay gabadhu nugul tahay oo u baahan tahay maaweelo iyo sabaalin iyo inuu garaadkeeda koriyo oo waalid iyo

waayeel isaga dhigo, waana inuu mar walba samirka baraa isla markaasna rajo geliyaa gooraha duruuftu adag tahay oo u sheegaa inay tahay marxalad kooban oo alle idanki laga gudbayo, oo khayr iyo mustaqbal fiican ay hiigsanayaan oo gaarayaan.

waa inuusan marna gabadha la guran oo isla fil yeelin, waa inuu dhaadhaceeda u dul qaataa oo si fudud ugu sheegaa wixii markaas ka khaldan, waa inuu dareensiiyaa inuu jecel yahay oo ka fekerayo oo uusan marna isku ladayn, waa inuu xusuustaa dardaarankii nabigeenna scw ee ahaa in haweenka khayr loo dardaarmo oo si qabow oo waano ah loola hadlo mar walba, oo laga fogaado in arrinta lagu adkeeyo oo shiile looga dhigo; nabigeennu scw wuxuu noo sheegay inaan marna gabadha laga raadin inay gar qaadata oo gefkeeda ka garowdo, maxaa yeelay buu yiri: feerta meesheeda sare ee qalloocan baa laga abuuray, feerta meesheeda qaroodan haddii aad toosi is tiraahdid waad jabinaysaa, waa sidaas oo kale oo haddii aad gadha garta ku adkaysid waa jabinaysaa, jabintaas oo furiddeeda ah, haddii kale waa inaad qallooceeda ku haysataa, qallooca laga hadlayo waa abuurta dumarnimada ah oo alle ku beeray oo beernugaylka ah, kaas oo ka imaanaya gacalmimada ku beeran oo loogu talagalay inay ilmaha ku ramato oo ku anqariso.

**Nabigeennu** scw wuxuu yiri:

“waxaa idiinku khayr badan kuwa haweenkooda u roon, anigaana idiinku roon haweenkayga”

nabigeennu scw wuxuu na baray inaan haweenka si gobannimo ah ula dhaqanno oo mar walba u roonaanno oo ka roonaanno, oo aannaan gefalkooda ka ficila qaadan, waa in marka ay degaan oo ay xaaladdu caadi ku soo noqoto si hufan oo qabow u dareensiinna gefkooda, markaas bay kuu garaabayaan oo gar qaadanayaan.

waa inuu hiigsiga reerka isugu jeexaa oo gabadha hadba barnaamij ay ka wada tashadeen oo horumarka mustaqbalkooda ku saabsan u soo jeediyaa, oo ku geeddi geliyaa; marka uu guriga joogo waa inuu gabadha ka caawiyaa hawsha guriga oo aad u culus, haddii uu dhaqaale helana waa inuu shaqaale u qabtaa hawsha guriga ku caawiya, markii ubad alle keeno oo ay gabadhu uur yeelatana waa inuu xaalkeeda la socdaa oo daryeel dheeraad ah siiya, marka ay uurka ilmaha ku siddo iyo marka ay araxda ku siddaba, xilkiina waa sii cuslaanayaa oo waxaa laga rabaa daryeelkii ilmaha iyo wixii mar walba looga baahnaa, gabadhu marka ay uurka yeelato bilaha hore oo dhan wallac bay la jirrataa oo waa tabar yaraataa oo waxay u baahan tahay inuu la socdo oo daawooyin vitamin iyo nafaqo gaar ah bay u baahan tahay ee waa inuu u dadaalaa, bilaha u dambeeya oo ay cuslaatana dhiigga ayaa sidoo kale ku yaraada oo markaasna daryeel kale oo gaar ah bay u baahan tahay, marka ay ummushana sidoo kale daryeel dheeraad ah bay u baahan tahay oo ilmihii baa jaqaya oo u baahan isna daryeelkiisa gaarka ah.

ababka ilmuhuna wuxuu ka bilaabanayaa habeenka uu dhasho oo waa inuu aabbuhu dhegaha uga addimaa, wax macaanna ku anqariyaa, meel fiican la seexiyaa, wax fiican oo loo geliyo loo diyaariyaa, isaga iyo hooyadiisba sidii ugxaantii loo dhawraa, dabadeedna hadba inta uu jiro bay ababintiisu le'ekaanaysaa. Diin-tenna islaamku aad bay qoyska

Guusha

daryeelkiisa uga hadashay oo kitaabka alle baa si aan xad lahayn uga hadlay, nabigeenniina scw in badan buu ka hadlay maxaa yeelay waa asaaskii ummadda, oo haddii qoysku hagaago ummadda oo dhan baa hagaagaysa

## **Wadooyinka Guusha**

Waxa aynu sii wadi doonaa maqaalkeenii inoo sii socday ee ahaa “wax ka baro astaamaha guusha keena iskuna day inaad ku dhaqantid” waxaan aad ugu mahadnaqayaa cidkasta oo la socotay maqaalkii hore

Waxa aynu hore u soo qaadanaya dhawr qodob oo ka hadlaya astaamaha guusha lagu gaadho bal hadaba aynu sii wadno qodobadii kale .

### **Dulqaad ka (patient)**

Dulqaadku wuxuu ka mid yahay aasaaska guusha nolosha maxaa yeelay qofkastaaba siduu u dulqaad badan yahay unbuu guusha u gaadhaa, samirku waa wadadii lagu gaadhayay guusha waxaana jira carqabado badan (many constrain) oo noloshaada ka hor imanaya intaad nooshay kuwaasna waxa looga badbaadi karaa waa dulqaadka oo la badiyo iyadoo markasta loo mahadnaqayo ALLAH laguna mahadnaqayo natiijo kasta oo aad la kulantid.

### **Dadaalka (effort)**

Dadaalku waa mid ka mida furayaasha guusha kaas oo loo baahan yahay in la sameeyo shaqo kasta ama hawl kasta oo la qabanayo in loo dadaalo sida ugu fiican uguna macquulsan. Tusaale ahaan inaad ku dadaashid sidaad u gaadhi lahayd qof kaa sareeya waxaana wanaagsan marka qofkastaa rabo inuu horumar gaadho waa inuu meel hiigsadaa ama uu jiraa qof uu is leeyahay gaadh.

### **Aqoonta (knowledge)**

Runtii sida aynu wada ognahay aqoontu qofka waxay geysaa meel sare sidaa daraadeed waxkasta oo aad is leedahay ku guulayso waa inaad aqoonteeda leedahay hadaanad lahayna waa inaad waayo aragnimadeeda leedahay, haday kugu cusub tahayna waa in aad raadsataa aqoonteeda iyo waayo aragnimadeeda adoo la tashanaya dadka aqoonta u leh hawshaa aad qabanayso.

Aqoontu waxay ka qayb qaadataa horumarka qofkasta, waxaanay geysaaa qofkastaaba halkuu hiigsanayay, aqoontuna waa wadadii guusha waxaanay ku tusaysaa jihada guusha aad rabtid.

### **Dhaqanka (culture)**

Markasta waxa wanaagsan inaad tahay qof dhaqankiisa ka adag markastana isku daya inuu dhaqankiisa baro dadka aan aqoon kana dhaadhiciyo dadka kale in dhaqankiisu yahay ka ugu wanaagsan marka laga hadlayo wax soo saarkana waa in aad Shay kasta oo oo ad rabto inaad heer ka gaadho ama aad soo saarto waa inaad eegto dhaqan ma loo leeyahay shaygan intaanad soo bandhigin dadka aad u soo bandhigaysaa dhaqan ahaan ma soo dhawaynayaan maxaa ka bixi kara marka la arko.

### **Balanqaadka (appointment)**

Balanqaadku waxa uu ka mid yahay waxyaalaha sida tooska qofka wax uga badala runtii qofba qofkuu ka balanqaad badan yahay ayuu ka horumar badan yahay tusale ahaan hadii aad haysato meherad oo aad macmiishaada u balan qaado inaad u keenayso alaab ay jecel yihiin waxay kuu horseedaysaa guul hadii aad xil haysana waxa wanaagsan inaad wixii aad balanqaaday aad fuliso ( do what you promise)

### **Kartida (Creativity)**

Shay kasta oo la qabanyo waa in aad awoodeeda leedahay oo aanad cidkale kuu fulin waxkasta oo aad jeceshayna waa inaad awood aad ku samayso aad leedahay awoodu maaha xoog laakin waa isku darka aqoonta, waayo aragnimada ,dulqaadka , iyo waxkasta oo awood kuu siinaya inay hawlkaasta sideeda u dhamaysid.

### **Hogaaminta (leadership)**

Inaad noqotid qof hogaamintiisu tahay mid ku dhisan daacadnimo iyo wax qabad loona bogay kaas oo aan cidna ku xidhnayn,tahayna qof go,aan gaadhi kara (**decision maker**) qof go,aan kaa uu gaadhay aanay cidna waxba yeelayn laakin yahay go,aan waxtar leh gaadhaya .

Waa in hogaamin taadu tahay mid ku dhisan isku darka sadexda qaybood ee ugu waaweyn hogaaminta marna aad tahay mid ku shaqayn kolba tii dan u ah cidii aad hogaaminaysid Taasna waxa sababaya danta iyo hogaanta aad u haysid dad kala duwan waxaanay hogaamintaadu sababaysaa in kolba halkii u baahan hogaamin aad u isticmaashid kolba nooca hogaamineed ee halkaa looga baahan yahay.

Masuul Wanaagsan ayaad tahay Hadii aad Astaamahan yeelatid -Talada Guusha  
Marka ganacsi cusub lafuri, waa uu fashilmaa inta badan, 75% ganacsiga cusubi

Guusha

waa uu fashilamaa halka 25% ay guuleystaan, waxaana taas loo sababeeyay in Hagaamiyaha amaba maamulaha ganacsigaasi uu layimaado astaamo iyo sifooyin hogaamiyaha ganacsiga looga baahan yahay.

Hada waxaanu halkan idinku soo gudbin doonaa (Warkaisii.com) sifooyinka madaxda ganacsiyada guulaystay ay ka wada siman yihiin, mana aha dhamaan madaxda guuleysata kuwa looga baahan yahay oo dhan balse waa qeybta ugu muhiimsanm Waana kuwan:

KU WANAAGSAN “ **SHAQA SIINTA IYO SHAQO KA ERYIDA SHAQAALAHA**”. Waa hogaamiye yaqaan sida loo xusho shaqaalaha faa’ido u keeni kara ganacsiga. Kuma xusho shaqaalaha aqoon shaqsiyeed, eex, qaraabo-kiil, nin-jeclaysi iyo dano ka baxsan ganacsiga. Waxa uu eegaa shaqsi u qalma baahida shaqo ee jirta , kana soo bixi kara si hufan. Sidoo kale, waxa uu shaqada ka cayriyaa shaqaala liita, aqoonta yar, aan shaqadooda kasoo bixin, qaladaad xad-dhaaf ah sameeyo. Kama baqo in uu cayriyo qof aan shaqadiisa kasoo bixi karin ama aan faa’ido u keenayn ganacsiga.

WAXA UU DHISAA DHAQAN. Hogaamiya fiican ma dhiso ganacsiga oo kaliya laakiin waxa sidoo kale uu dhisaa dhaqan hufan oo ku dayasho mudan ama wado u noqda dadka ka hooseeya. Waxa uu dhisaa dhaqan nadiif ah. Dhaqan ku salaysan daacadnimo, karti, hufnaan, eex la’aan, run sheeg,wada shaqayn, hami, iyo hiigsi fog. **DHAGAYSTA OO FICIL SAMEEYA**. Hogaamiya wanaagsani waxa uu si daacad ah

u dhagaystaa shaqaalihiisa dhamaan wixii talo ama dhaliil ah kadibna waxa uu ku camal falaa talooyinka iyo dhaliila haas. Bini'aadam ku ma dhamaystirna, sidaa darteed Hogaamiyaha wanaagsani waxa uu og yahay waxku oolka talooyin iyo dhagaysiga shaqaalaha.

**HAL ADAG / AAN SI SAHLAN U QUUSAN.** Hawl kasta ee bilow ahi waxa ay martaa sadex heer oo kala ah 1- bilow hore oo qarash un la galiyo ganacsiga 2- Dhaqan gal: oo ah marka ugu horaysa ee ganacsigu hawl galo laakiin weli macaamil iyo suuq fiican uusan yeelan ama aan si wanaagsan loo baran taa oo dhalisa inta badan qasaare hore. 3- faa'dio iyo Guul: Marka ganacsigu sal dhigto, yeesho macaamil balaaran oo daqli fiican iyo faa'ido dhalo. Ogow ganacsiyada badani waxa ay burburaan Heerka 2aad oo ah hawl galka hore, sidaa darteed hogaan ka wanaagsani waxa uu u dhabar adaygaa qasaare iyo wareer kasta ee ka dhasha inta ganacsigu si fiican uu sal dhiganayo.

**ARAGTI LEH:** Ganagsi kasta waxa uu ku dhisan yahay aragti baahi dadweyne. Hadii aysan jirin baahi dadweyne, ma jirayo ganacsigaas. Adeeg ama Badeeco, ganacsigaagu waa in uu leeyahay aragti dheer ee baahi dad.

**HAWSHA KU DHEGA.** Marka ay jirto shaqo ama hawl markaa taagan, waa uu ku dhegaa ilaa laga dhameeyo hawshaas. Marna kama war-wareego si kasto hawshaas u dhim iyo haraad badan tahay. Sidoo kale waxa uu jaheeyaa kooxda qabanaysaa hawshaas ilaa ay ka dhameeyaan sida ugu hufan oo ugu dhaqso badan. Waxa uu waqtigiisa iyo awoodiisa galiyaa si loo dhamaystiro hawshaas taagan.

**SI CAD U HADLA.** Dadku waa ku kala fiican yahay hadal ka, laakiin hogaamiya wanaagsan waxaa sife cad u ah in uu si cad u hadlo marka uu ka hadlayo shirkada , badeeco ama adeega la qabanayo, ujeedada ganacsiga, aragtida dheer , siyaasada la raacayo isagoo weliba adeegsada waxyaabo dad ku aad aad u xusuustaan. **U**

**HAGAR BAXA OO U DOODAA MACAAMIISHA.** Ganacsi kasta waxa uu ku dhismaa helida macaamiil jecel adeega iyo badeecada ganacsiga. Hadii tayada adeega macaamiishu hoos u dhaco ama badeecadu xumaato waxa luma macaamiisha. Hogaamiya wanaagsan waxa uu mar kasta u doodaa macaamilka gadanaya badeecada ama adeega shirkada. Waxa uu u hagar baxaa si macaamiishu u hesho adeega ama badeecada ugu wanaagsan suuqa dhan kasta. Waxa uu naftiisa kasoo qaadaa macaamiil ka. waxa uu raadiyaa ciladda ama tayo xumada adeega ama badeeca shirkadiisa. Waxa uu ku fakaraa sababta ama faa'idada qofka gadanaya adeega ama badeecada uu ka heli karo shirkadiisa.

**KU WANAAGSAN QANCINTA DAD KA.** Qof ka shirkad madax u ahi waxa uu la macaamilaa dad dano kala duwan leh. Sida macaamiisha oo raba waxa milkiilayaashu aysan raali ka ahayn. Qaybaha kala duwan ee shirkada oo kooxda fikrad duwan la imaan karto, iwm. Hogaamiyaha wanaagsan waxa uu isku duba ridaa ujeedada iyo fikirka dhamaan dad ka uu la macaamilayo. Waxa uu ka gadaa aragti dheer ee dhirkada oo uu ku qanciya koox kasta. Waxa uu isku hal meel u jiheeyaa shaqaalaha shirkada oo dhan. xigasho: Mark Suster.

Guusha

si faahfaahsan u shaqeeya. Hogaamiyahu waxa uu kormeeraa adeega ama badeecada bilow ilaa dhamaad. Dhanka garash galinta, soo saarka, qaybinta , suuq gaynta iyo macaamilka intaba, Hogaamiyaha wanaagsan waxa uu u eegaa si faahfaahsan dhamaan marxaladaha kala duwan ee ganacsiga si uusan u soo galin mugdi. Xirfad u leh la qabsiga isbadal ka. Hogaamiyaha ugu wanaagsan ee ganacsi waxa uu awood u leeyahay in uu la qabsado ama la jaan-qaado badeecada iyo adeega ganacsi ee si lama filaan ah isbadal ugu yeesha suuqa iyo dalabka macaamiisha.

Aan noqon barti yaqaan, ee la socda awoodaha suuqa iyo isbadal ka. U Samayn Kara Go'aan Si Dhaqsa Ah. Ganacsiga yar-yar waxa uu inta badan u baahan yahay go'aano dhaqso xaaladaha isbadal ka suuqa. Hogaamiyaha wanaagsan waa kan sameeya Go'aano dhaqso ah oo sax ah.

Loolanka wayn sameeya. Hogaamiya wanaagsan waxa uu ku loolamaa suuqa sida kasbashada macaamiisha, helida shaqaalaha ugu fiican, ku tar-tamida heshiisyo waaweyn iyadoo suuqu uu yeelan karo loolan xoogan.

Geesi ah oo karti leh. Hogaamiyaasha ugu wanaagsan waa kuwa leh geesinimo ay ku bilaabaan ganacsi, ugu adkaystaan inta uu kacayo ganacsigaas, laakiin hadana kasoo dhexbaxa dhib kasto oo la yimaada karti dheeri ah. Mar-marka qaarkood sameeya gao'aano aad shaqaaluhu raacsnayn. xigasho: Tolis Dimopoulos.

**Marna Aan Ka Joogsan Fulinta Aragti Dooda.** Hogaamiyaha wanaagsan waxa uu u joogta ah u kormeeraa in la fuliyo aragtida shirkada. Waxa uu saamayn ku yeeshaa in shaqaaluhu ay u fuliyaan hawshooda si waafaqsan aragtida shirkada. Waxa uu hubiyaa in hiigsiga shirkadu u jeedo halka uu doonayo.

DEEQSI AH. Dadku waxa inta badan ay jecel yihiin in ay la shaqeeyaan hogaamiye deegsi ah dhanka la macaamilka shaqaalaha, Macaamiisha, shirkadaha la hawlgala, iwm.

Hadii aad tahay hogaamiye shirkad ganacsi oo cusub , xusuuso oo ku dhaqan talooyin kan. Waxa aan hubaa badan kood in ay ku caawin doonaa hadii aad raacdo.

## **Guuleystayaasha Caqliga Badan**

Haddi aad Leedahay 21-daan Tilmaam, Ogow Waxaad Kamid Tahay Dadka Adduunka Ugu Caqliga Badan



Fikrad ahaan waayo aragnimadeeda ayaa naga dhigayo kuwa awood leh, Inaad Noqoto mid niyadsan, awoodo inuu nooshiisa xakameeyo isla markaasna aan dareemin inuu naftiisa ka xun yahay, waa qaar kamid ah sifooyinka ay waajib tahay inaan sameyn.

Ma aaminsan tahay inaad leedahay mid kamid Ah sifooyinka,? haddii aad tahay qof leh waxad ku raaxeysaneysaa maskax awood leh, waadna ka adag tahay arrin kasta oo kusoo wajahdo xataa kuwooda ugu adag.

Garro sida aad u kala saari laheyd caqliga iyo Caadifada: Waxaa laga maarmaan ah inaad kala garato caqliga iyo caadifada Xilliga aad ku jirto xanaaq si aad u qaadato go,aan wanaagsan.

Wagtigaaga ku qaado qaab miro dhal leh: Waxaa macquul ah in qofka uu sameeyo kumanaan cudur daar haddii uusan sameyn shaqo uu qaban lahaa, balse dadka maskoxdooda awooda leedahay waxay xoogga saaraan waxay doonayaan, waxayna ka fogaadaan inay waqtigooda ku lumiyaan wax aan mirro dhal aheyn.

Ku Kalsoonow Awooda aad kula qabsan karto Isbadalka: Nolosha markasta way sii hormareysaa, mararka qaarna waxaa dhib kugu noqoneyso inaad la qabsato midda cusub, dadka intoo badan waxay isku dayaan inay la dagaalamaan isbadalka, laakiin dadka garaad weyn u saaxiibka ah waxay si deg deg ah ula qabsadaan nolosha cusub.

Guusha

Ka Fagow Cabsida: Dadka intooda badan waxay ka fogaadaan waxyaabaha keeni kara cabsida, laakiin qaarkood waxay isku dayaan inay wajahaan cabsida si ay dadka kale ugu muujiyaan qaab wanaagsan, laakiin dadka caqliga badan way ka hortagaan cabsida cad ee naftooda kuu wajahdo.

Qaladkaaga Wax Ka Baro: Dadka caqliga awood ku dhisan leh ficiladooda kama marmarsiiyoodaan mana ka qariyaan dadka kale qaladaadka ka dhacay, waxayna u noqotaa cashir si aysan sidaan camal ugu dhicin.

Isku Fiiri Sida aad hadda tahay iyo sida aad dooneyso inaad noqot:

qofka leh maskxda fiican wuu ku qanacsan yahay waxa uu hadda yahay, laakiin isla watigaas wuxuu kasii shaqeeyaa sidii uu midaan mid ka fiican u gaari lahaa.

U Dabaaldeg guusha Dadka Kale: Dadka Caqliga Fiican leh waa kuwa awoodo inay dadka kale caawiyaan, guusha ay gaaraan dadka kale kama maseeraan, taas badalkeeda waxay muujiyaan inay u dabaal dagaan guusha.

Qaadashada Go,aano waafaqsan Qiyamka: Haddii aad tahay qof waafaqsan qiyamkiisa, waa inaad muhiimada siisaa mana kala kulmi doontid dhibaato qaadashada go,aamada, tanna waa mid kamid ah waxyaabaha lagu garto inuu qofka yahay mid caqli badan.

Horumarinta Xirfadaada: Dadka Caqiga badan waxay ku dadaalaan inay horumarin ku sameeyaan xirfahooda.

Ku Noolow Nolo Dhab Ah: Dadka caqliga leh, waxay aaminsan yihiin naftooda, ficilada ay sameenayaana ma khilaafsano hadaladooda.

Sharaftaada Qadari Ha Fiirin Xoolo: Dadka caqliga leh waxay qadriyaan nafsad ahaantooda, balse ma fiiriyaan waxay heystaan, mana kala jeclo haddii ay guul dareystaan iyo haddii ay qasaaraan.

Ogow In Guusha ay mudan tahay in la sugo: dadka caqliga badan way garanayaan sida loo sugto guusha, wayn og yihiin in guusha ay qaadaneysa waqti dheer, sidoo kalan sababr la,aanta inay tahay mid kaa dhigeysa qof liita.

Waxaad masuul ka tahay wixii aad sameysa : Caqli badnaashaha ma damaanad qaadeysa inaad dambi galeyn, dadka oo dhan way gafaan, balse midda ugu muhiimsan ayaa ah in gafka wax laga barto.

U Arag dhibka inuu yahay fursad: Caqabada iyo dhib kasta oo kusoo wajaho waa fursad kale oo aad horumar ku sameyn karto, dadka intooda badan waxay dareemaan ciriir marka ay soo wajahaan dhibaataada, laakiin qofka caqliga u saaxiibka ah way caqbalaan waxyaabaha soo wajaho noloshooda ay u noqdaan kuwa sii fiicnaada.

Muuji Mahadceli iyo Qanacsanaantaada: Intii ay sii raadin lahaayeen dheeraad, kuwa caqliga leh waxay rumeysan yihiin inay heystaan fursado badan oo ay guul ku gaari karaan, wayna yaqaaniin intay heystaan sidii looga mahadcelin lahaa.

Guusha

Xoogga Saar Waxa Aad Taqaan: Dadka maskxda fiican leh waa kuwa waxtar leh noloshana guul ka gaaro, waxayna u go,aan oo ay waqti iyo juhdi ku bixiyaan waxa ay ku xeel dheer yihiin.

Sare u Kac marka Aad Fashilmato Kadib: dadka caqliga badan fashilka uma arkaan wadada dhamaadka balse waxay u arkaan inay tahay bilaw keeni Kara inay ugu dambeyntii guul gaaraan.

Noqo mid waaqiciga la socdo wax fiicanna rajeeya: Dadka Garaadka leh waxay markasta leeyihiin rajo fiican, waxayna rumeysan yihiin inay sameeyeen waxa ugu fiican oo ay awoodeen, balse isla waqtigaas Cagaha dhulka way ka qaadaan.

Ka Shaqey inaad saxdo meelaha aad ka liidato|: inta badan dadka waxay isku dayaan inay qariyaan ceebahooda, laakiin qofka caqliga wanaagsan leg kama cabsoodaan inay wajahaan meelaha ay ka liitaan, dib ayey isaga saxaan waxayna ka guuleystaan.

Diyaar U Ahaw Inaad Xaliso Dhibaataada: waxaa ku hortaalo laba arrin midkood, inaad waqtigaaga ku qaadato Cabasho, ama inaad xal u raadiso dhibaataada sida ay sameeyaan kuwa caqliga leh.

Diyaar U Ahaw Inaad waxyaabo Cusub Barato: Maalin cusub, qof cusub, xirfad cusub, waa fursada kale oo lagu barto waxyaabo cusub, dadka maskaxdooda awooda leedahay had iyo jeer waxay joogteeyaan waxbarashada.

**Ramadanta iyo Tarbiyaynta Guusha**

Markaa Aad ugu fiirsano sababaha guulaha waa wayn Ee Islaamku gaadhay bishan Fadli-

geedu aadka u wayn yahay Laga Bilaabo dagalkii Badar ee waynaa hadana aan ku xijiisino

Furashadii magalada barakaysan ee Maka sidoo kale gushii Daariq binu siyaad uu ku furtay

dalka Andalus sidoo kale Dhacdadii tariikhiga ahayd ee aynu jaaluut tasoo lagu jabiyay  
Cadowgii Islamka meelaha aadka u fogfog kaga soo duulay Ee ahaa maangooliyiinta ama ta-

taarka ilaa tirada guulaha Bisha ramadaan ayaa kor u dhaafeen "185" guulood iyo fura-

shooyin Waa wayn oo badashay socodka taariikhda.hadaba markaan Isku xidhno guulaha

aadka u badan ee islaamku gaadhay iyo Bishan aadka u fadliga badan waxaa inoo soo baxay

qodabadan :

Bisha ramadan waa bishii 1 1.sabirka guushana waxay mar kaste La jirtaa sabirka sidii ya-

raanta wanaagsan iyo qorshayn hadaf Fog leh maaha dagdag iyo samir la,aan kuwaas oo

dayaca Wax kasta marka si isku mid ah qofka bulshada iyo umadahaba Guushu ma taqaano

Guusha

in shayga la dagdagsado intuuuna gaadhin Ka hor waxa ay keentaa in la seego waayo Guushu

ma taqaano Dagdagsiimo iyo in hadii wixii la rabay horay loo waayo hawsha La joojiyo ama

dagaalka laga baxo taasina waxay keentaa jabid Foolxun oo ku timaada cidii sabirka ka

booda.hadaba bisha Ramadaan iyo sabir waxay leeyihiin xidhiidh aad u wayn maxaa Yeelay

waxaa laga soomayaa wixii afka iyo ibtuba rabeen oo qofka.

Sooman wuxuu iska joojinayaa cuno cabitaan wax kaste oo naftiisu Jeclayd inta maalin oo

dhan.mar hadii qofka laga mamnuucay wixii Xalaasha u ahaa waxaa ka sii mudan inlaga fogaado wixii xaaraanta Ahaa awalba sida xanta,beenta,cayda iyo dhamaan wixii xun oo dhan Hadaba qofka oo ka, ,La soco qeybaha kale.

**Tixraac**

Hamse diiriye, Qoraaga Buugga 'Sirta Guusha ' (Secret of Success) ...Above statements, it's the first chapter of the Book.

**Qore; - Dr Hamse Mohamed Diiriye  
634408673 / 63 4698316**

Guusha